


Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA

Diseember 2021

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Diseembar 2021 ayaa ahaa 126.99, marka la barbardhigo 127.27 bishii Nofeembar 2021.

Isbedel bileedka, Diseembar 2021, marka la barbar dhigo Nofeembar 2021, ayaa hoos u dhacay -0.22 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo sare u kac bille ah oo gaaraya 0.64 boqolkiiba bishii Nofeembar 2021. Majiro sare u kac bille ah oo la taaban karo intii lagu guda-jiray Diseembar 2021. (Jaantuska2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Diseembar 2020 iyo Diseembar 2021) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB sare u kacay 5.67 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 5.03 boqolkiiba ee 12kii bilood (Nofeembar 2020 iyo Nofeembar 2021).

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Diseembar 2021 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Diseembar 2021	
Tusaha bishan (Diseembar 2021)	126.99
Tusaha bishii hore (Nofeembar 2021)	127.27
Tusaha sanadkii hore (Diseembar 2020)	120.18
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	-0.22%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.67%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka Boqoleyda ee 12billood.

Tixraaca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Diseembar 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Diseembar 2021

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Diseembar 2021

Heerka sicir-bararka bisha Diseembar 2021 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Diseembar 2020 iyo Diseembar 2021.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.67 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Diseembar 2020 iyo Diseembar 2021, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Nofeembar 2020 iyo Nofeembar 2021 uu ahaa 5.03 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Diseembar 2021 ayaa hoos u dhacay -0.22 boqolkiiba, marka labarbardhigo sare u kac gaaraya 0.64 boqolkiiba bishii Nofeembar 2021.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Diseembar 2021.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay 1.06 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Diseembar 2021 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 1.37 boqolkiiba bishii Nofeembar 2021. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu hoos u dhacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 7.39 boqolkiiba bishii Diseembar 2021. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 7.42 boqolkiiba Nofeembar 2021.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa hoos u dhacay -0.01 inta lagu jiray bishii Diseembar 2021. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 5.49 boqolkiiba bishii Diseembar 2021.

Dhammaan qeybaha TSB-da iyo qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Diseembar 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Diseembar 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 14.09 boqolkiiba bishii Diseembar 2021. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid qalabka caafimaadka oo gaaray (+33.84 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid cirbadaha Imbishiinta-ka (+25.00 boqolkiiba).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa sare u kacay 7.39 boqolkiiba, 12billod ee la soo dhaafay Diseembar 2020 iyo Diseembar 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid cuntada (+7.77boqolkiiba), Gaar ahaan Saliida iyo Dufinka (+62.70 boqolkiiba) iyo hilibka (+13.45 boqolkiiba).
- **Hawo bedelashada & dhaqanka** ayaa sameeysay sare u kac sanadle ah oo gaaraya 5.75 boqolkiiba Diseembar 2021. Waxaa qiimahoodu sare u kacay maqal-araga, sawirada iyo agabka lagu soo saaro warbixinada oo gaaray (+6.54 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid TV-da (+33.33 boqolkiiba) iyo dhalooyinka fidsan(TV-da) (+16.67) boqolkiiba.
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa lagu diwangaliyey sare u kac sanadle oo gaaray 5.49 boqolkiiba Diseembar 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid biyaha iyo adeegyada yaryar (+28.52 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid biya qeybinta (+17.64 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa muujiyey sare u kac sanadle oo gaaraya 4.28 boqolkiiba Diseembar 2021. Kor u kaca ugu badan ayaa ka yimid adeega kala gudbinta agabka shaqsi ahaaneed oo gaaray (+19.87 boqolkiiba).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 4.15 boqolkiiba bishii Diseembar 2021. Sare u kaca ayaa waxa sababay qiima koror ku yimid qiimaha dharka (+4.57 boqolkiiba). Gaar ahaan qiimaha dharka Dumarka oo gaaray (+4.77 boqolkiiba).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha 2021 (-)

- **Tubaakada** ayaa sicirkooda sanadlaha ahi hoos u dhacay -20.52 boqolkiiba bishii Diseembar 2021. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Narcotics (-30.00 boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **Diseembar 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

B. Qeybaha ugu weyn ee saameeya TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Diseembar 2021
(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay (+)

Guud ahaan, ma jiraan wax qiima koror bille ah oo muuqdey bishii Diseembar 2021.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay (-)

- **Tubaakada** ayaa sicirkooda Bilaha ahi hoos u dhacay -8.27 boqolkiiba bishii Diseembar 2021. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Narcotics (-10.26 boqolkiiba), hoos u dhaca waxaa sababay qiimaha Qaadka oo aan fadhin.
- **Maqaayadaha iyo hoteelada** ayaa muujiyey hoos u dhac bille ah -6.78 boqolkiiba bishii Diseembar 2021. hoos ugu weyn ayaa ahaa adeega cunta bixinta oo ahaa (-10.63boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey hoos u dhac bille oo gaaraya -4.49 boqolkiiba Diseembar 2021. Hoos u dhaca waxaa sababay daryeelka shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray-7.33 boqolkiiba.
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa muujiyey hoos u dhac bille ah -3.83 boqolkiiba bishii Diseembar 2021. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (-4.20 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey hoos u dhac bille ah -2.57 boqolkiiba ee Diseembar 2021. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid weelasha dhalada, alaabta miiska iyo maacuunta guriga (-8.77boqolkiiba).

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha 2021 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Diseembar 2020 TSB	Nofeembar 2021 TSB	Diseembar 2021 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan qeybaha TSB	100.00	120.18	127.27	126.99	-0.22	5.67
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	122.83	130.53	131.91	1.06	7.39
Tubaakadda	1.25	125.61	108.84	99.83	-8.27	-20.52
Dharka & Kabaha	5.03	143.69	155.60	149.65	-3.83	4.15
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	112.32	118.49	118.48	-0.01	5.49
Agabka Guryaha	2.93	110.67	113.55	110.63	-2.57	-0.03
Caafimaadka	5.00	141.26	161.16	161.16	0.00	14.09
Gaadiidka	3.77	105.03	111.35	109.52	-1.64	4.28
Isgaarsiinta	2.80	101.10	103.03	103.03	0.00	1.92
Hawo bedeleshada & dhaqanka	1.00	98.05	103.75	103.68	-0.07	5.75
Tacsiinta	4.00	109.80	109.80	109.80	0.00	0.00
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	138.76	143.51	133.78	-6.78	-3.59
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	118.87	125.85	120.21	-4.49	1.13

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Janaayo 2022 waxaa la baahin doonaa 15 Febraayo 2022. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistikada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Diseembar 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Diseembar 2021 marka loo eego COICOP ka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Diseembar 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia